



Jamhuuriyada Somaliland.

Golaha Wakiilada JSL.



Warbixinta



**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 18^{aad} Golaha
Wakiilada JSL.**

09/06/2012---16/07/2012

Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 18^{aad}

Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 18^{aad}

Mudanayaal

Si aad hawlaha u qorshaysan kal-fadhiga 19^{aad} ee Golaha Wakiilada u dardar galino una dhameystirno hawlahii ina baaqdey ee ramdaantu ka soo gashay kal-fadhigii hore inagoo gudanyana Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 18^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

1. Ajandaha Kalfadhiga 18^{aad} ee Golaha Wakiilada.

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

| No. | Magaca Xeerka | Marxalada aa u marayo | Cida Gacanta ku haysa |
|-----|-------------------------------------------------------------------------|-----------------------------------|-------------------------------------------|
| 1. | Xeerka Fayodhowrka Hilibka | Akhriska 1aad | Gudidda Degaanka Xoolaha Kh.Dabiicigaa |
| 2. | Xeerka Nabadgelyada Wadooyinka | Draft | Gole Waynaha |
| 3. | Xeerka aasaaska komishanka maamulwanaaga iyo ladagaalanka musuqmaasuqa. | Draft | Gudida Ilaalinta, Hantida qaranka |
| 4. | Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Banka | Akhriska 1aad | Gudidda Dhaqaalaha |
| 5. | Xeerka Baanka Islaamka | Akhriska 2aad | Xoghaynta |
| 6. | Xisaab-xidhka Dawladda 2008,2009,2010 | Lagu celiyey Hantidhowrka Guud | Hantidhawraha Guud ee Qaranka |
| 7. | Xeerka Statistics law | Draft | Gudidda Arrimaha Dibadda |
| 8. | Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka | Draft | Gudidda Joogtada ah |

3. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
4. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

Kal-fadhigii 18^{aad}

| No | Kal-fadhiga | Taariikhda uu furmay | Taariikhda uu xidhmay |
|----|-------------------|----------------------|-----------------------|
| 1. | 18 ^{aad} | 09/06/2012 | 16/07/2012 |

Kal-fadhigan oo Golahu qabtey hawlo oo muhiim ah sida ansixintii Masuuliyiinta Qaranka, Waxkabadalkii Xeerka doorashoyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr.20

Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 18^{aad}

lifaaqqii 4aad, waxaan halkan idiinku soo Gudbinaynaa dhamaan Waxqabatkii Gole weynaha, Shirgudoonka iyo Gudiyada Golaha oo kala ahaa sidan soo socota.

2. Warbixintii Shirgudoonka iyo Gudiyada kale ee Golaha

Warbixintii shirgudoonka ee kal-fadhigii 17^{aad} ayaa ugu horaysay warbixinadii kal-fadhigaa laga akhriyay Golaha intaa ka dibna waxaa warbixinadii gudiyadu ahayd sidan hoose:-

| No | Gudidda | Cida jeedisay |
|----|---------------------------------------------|---------------------------------|
| 1. | Warbixintii Shirgudoonka ee Kal-fadhigii 17 | C/risaaq S. Ayanle Xoghaya Guud |

3. Xeerarka Goluhu Ansixiyay.

| No | Xeerka | Taariikhda | Halka Loo gudbiyay |
|----|----------------------------------------------------------------------------|------------|--------------------|
| 1. | Wax iyo Kaabista Xeerka Doorashiyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deeganka | 05/02/2012 | Madaxweynaha |

4. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay



| No | Magaca Masuulka | Xilka uu hayo | T/la Ansixiyay |
|----|---------------------------------|--------------------------------------------------------|----------------|
| 1. | Md.Cabdi Yuusuf Ducaale (Boobe) | Wasiirka Wasaarada Warfaafinta | 08/07/2012 |
| 2. | Md. Cali Cabdi Hure | Wasiirka Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta | 08/07/2012 |
| 3. | Md. Cabdilaahi Abokor Cismaan | Wasiir ku-xigeenka Amniga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha | 08/07/2012 |
| 4. | Md. Mawliid Maxamuud | Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada | 08/07/2012 |

Warbixinta Shirgudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 18^{aad}

| | | | |
|----|------------------------------|-------------------------------------------------------|------------|
| | Ibraahim | Arrimaha Dibada JSL | |
| 5. | Md. Nuux sh. Muuse Ducaale | Gudoomiyada Hay'adda Shaqaalaha Dawlada JSL | 08/07/2012 |
| 6. | Md. Maxamed Cumar Cabdilaahi | Gudoomiye ku-xigeenka hay'adda Shaqaalaha Dawlada JSL | 08/07/2012 |



5. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixno iyo Xogwaran siiyay.

| No | Masuulka | Xilka |
|----|--------------------------|--------------------------------|
| 1. | Md, Axmed X. Cali Cadami | W. Wasaarada Gaashaandhiga |
| 2. | Md. Ciise Xamar | Gudoomiyaha Komishanka Qaranka |

6. Kal-fadhigii 12 ee aan Caadi ahayn.

7/08/2012 waxay yeeshey fadhigii 12^{aad} aan caadi ahayn Golaha Wakiilada kaas oo lagu ansixiyey waxkabelka iyo kaabista (5^{aad}) shanaad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka XeerLr/20/2001.

Fadhigan ayaa waxaa kasoo xaadiray 53 mudane ,waxaana lifaaqa shanaad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Digreetadiisa uu madaxweynuhu Golaha ugu soo gudbiyey ka hor akhriyey Golaha Xoghayaha guud ee Golaha Wakiilada **Md. C/risaaq Siciid Ayaanle**,intaa kadib waxaa Goluhu cod u qaaday in xeerka maanta la ansixiyo iyo in lasoo akhriyo,waxaana laysku raacay in la ansixiyo isla maalintaa maadaama Baahi badan qaranku u qabo si loo galo doorashooyinkii Golayaasha Deegaanka.

Intaa kadib wuxuu Goluhu guddo galay ansixinta Xeerka waxaana cod loo qaaday wax ka bedelka shanaad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Waxaanu u ansaxay sidan soo socota.



Waxaa ogolaaday insixinta Lifaaqa **37Mudane**, Waxaa diidey,**4Mudane**, Waxaana ka aamusay**12Mudane** Guddoomiyuhuna muu codayn sidaas ayaanu ku ansaxay wax ka bedelka shanaad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanku, wuxuuna u gudbiyay Wareegtadii Ansixinta Xeerka Golaha Guurtida oo isagu kal-gadhi aan caadi ahayn ku ansixiyay Wax ka-badalka oo uu Golaha Wakiiladu markii danbe u gubiyay Madaxweynaha JSL Md. Axmed Maxamed Siilanyo.

7. Xeerarka Goluhu ka doodey/loo qeybiyay walina la Ansixin

1. .Xeerka Baananka Islaamiga ah, Goluhu wuxuu dood ka dhiibtey Xeerka Baananka Islaamiga ah oo ay 10 mudane doodiisa ka qayqaateen laakiin aanu Goluhu ansixin kal-fadhigii 18aad oo wakhtigii Ramdaantu ka soo gashay kal-fsadhigiina ka dhamaadey. Sidoo kale wsxaa Golaha loo qaybiyay Xeerarkan aan wali laga doodin
2. Xeer Nabadgalyada Wadooyinka
3. Xeerka Fayadhowrka Hilibka
4. Xeerka Saamiga Kootada Haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay.

Waxaa kale oo Golaha loo qaybinayay heshiiskii London oo ay wada saxeexeen Wakiiladii Somaliland iyo Somalia iyo Heshiiskii Dubai oo ay wada saxeexeen labada madaxweyne ee Somaliland iyo Soomaaliya **1-Mudane Madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo iyo 2. Madaxweyne. Sh. Shariif sh. Axmed.**

Iyadoo ay tahay markii ugu horaysay ee Golaha Wakiilada la horkeenay heshiis ay Xukuumada Somaliland la gashay dalkale.

8. Xeerarka Guddiyadu hayaan

| No. | Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan |
|-----------|----------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| 1. | Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada |
| . | <ol style="list-style-type: none"> 1) Xeerka Midaynta Cashuuraha 2) Xeerka Caymiska Qaranka 3) Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency 4) Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo M/ku-xigeenka |
| 2. | Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka |
| | 1) Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud. |
| 3. | Guddiga Joogtada iyo Anshaxa |
| | <ol style="list-style-type: none"> 1) Xeerka Anshaxa Guud Xeerka 2) Xeerka Habka Maamuuska Mudanayaasha |
| 4. | Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta |
| | <ol style="list-style-type: none"> 1) Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose 2) Xeerka Saxaafada 3) Xeerka Ciyaraha |
| 5. | Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud |
| | <ol style="list-style-type: none"> 1) Xeerka Caasimada 2) Xeerka Saamiga Kootada Haweenka iyo dadka laga tirade badan yahay 3) Xeerka Booliiska |
| 6. | Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah |
| | 1) Xeerka istaatistikiska |
| 7. | Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta |
| | <ol style="list-style-type: none"> 1. Xeerka Fayadhawrka Hilibka 2. Xeerka shidaalka (patroleum Act) 3. Xeerka Macdanta (Miniral Act)s |
| 8. | Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa |
| | 1. Xeerka Haayadda Maamul Wanaaga |

9. Waxqabadka Guddiyada Golaha.

Guddida Joogtada iyo anshaxa.

Guddigu iyadoo ka wakiila Fasaxyada Golaha waxay kal-fadhigii 17^{aad}, iyadoo inta fasaxa lagu jiro la kulma Masuuliyiin Qaran oo xilal kala duwan haya iyadoo ka duuleysa waajibaadkeeda Dastuurka iyo Xeer Hoosaadka Golaha, Muhiimadana siinaya xil-gudashada hawlaha Qaran, Wasaaradaha iyo Hayadaha dawlada, laakiin iyadoo lagu jirey Bishii barkeysneyd Ramdaanta Mudanayaasha ay safaro ugu kala baxeen Gobolada wax shir ah oo yeeshen ma jirin fasaxii u dhaxeeyay labada kal-fadhi.s

Guddida Arrimaha Gudaha, Difaaca iyo Nabadgalyada.

Waxaa 25 june 2012 kulan xogwaraysi ah kuwada yeeshay Guddida Arimaha Gudaha iyo komishanka Doorashooyinka Qaranka, kulankaas oo ku saabsanaa wax ka bedel lagu samaynaayo xeerka doorashooyinka madaxtooyada iyo Golayaasha deegaanka ee xeer No.20.



Gaar ahaan waxaa ay labada guddi isla falan qeeyeen Qodobka kamid ah wax ka bedelka lagu sameeyey xeerkan uu ka midyahay Qodobka 22aad oo ka hadlaaya habka doorashada,ayaa waxaa lagu bedeley calaamadihii markii hore lagu geli jirey doorashada ee murashixiinta ama ururada la siin jirey in looga dhigo numbaro, hadaba waxa guddida doorashooyinku ay taas ku sababeeyeen qodobadan soo socda.

- ✦ Astamaha murashaxiinta oo aan lawada heli karin in kabadan ,tusaale 225 oo hargeysa ah
- ✦ baaxada oo aan ku filayn oo goob weyn qaadanaysa marka la isticmaalo calaamadaha
- ✦ Wakhtiga ay qaadanayso oo badan , taas oo saamanaysa dadkii ka
- ✦ codaynayey goobta oo yaraanaya.

- ✦ Waxaa ay saamayn ku yeelanaysaa nabad-gelyada kadib marka codaynu wakhti dheer qaadato
- ✦ Waxaa arintan aanu ku qancinay caawiyayaasha doorashooyinka Somaliland
- ✦ Waxaa sanaaduuqda loo badinayaa Goobaha warqada lagu codaynayo oo weyn awgeed

Hadaba waxaa ay labada dhinac isla garteen in qodobkaa loo daayo sidaa loo soo jeediyey oo ah in astaamihii loo bedelo lambaro, sababahaas aan sare ku sheegnay awgeed

Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta

kulan ay yeesheen Guddida Arimaha Bulshada iyo Diinta ee Golaha Wakiilada JSL iyo masuuliyiinta Wasaarada Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dhaqanka, Kulankaas oo ahaa mid is xoqwararsi ah oo ay Gudidu warbixino kaga dhegaysanaysay masuuliyiinta Wasaaradaasi, isla markaana ay su'aalo kaga waydiinayeen hawlaha ay qaranka ugu xil saran yihiin.

Waxa ay sheegeen masuuliyiintaa wasaarada ka socotay in mudadii ay xilka hayeen ay u qabsomeen waxyaalo farabadan oo ay ka mid yihiin dayactir ay ku sameeyeen Garoonka kubada cagta ee magalaada Hargeisa oo ay la kaashadeen shirkada Dahabshiil iyo qaar kale oo hada dhismahoodu socdo. Waxa kale oo ay wasaaradu qabanqaabisay tartamo ciyaaro ah oo loo qabtay ardayda Jaamacadaha iyo Dugsiyada sare.

Waxa kale oo ay masuuliyiintu sheegeen in baahiyaha ugu muhiimsan ee wasaarada imika ay ka mid yihiin in Xarun Wasaarada ku filan loo dhiso iyo in Goobihii lagu ciyaari lahaa ciyaaraha kala duwan ee dadkeenu hidaha iyo dhaqanka u lahaayeen la aburo.

Gebo-gebadii waxaa Guddida Arimaha Bulshada iyo Diinta iyo masuuliyiinta Wasaarada Dhalinyarada, Ciyaaraha iyo Dhaqanka isla qaateen inay wada shaqayntooda xoojiyaan isla markaana ay kulamo danbe oo ay ku sii xoojinayaan hawlaha ka dhexeeya ee ay qaranka u

Sidoo kale waxay la kulantay Gudiddu masuuliyiin Wasaarada caafimaadka oo ay ka mid ahaayeen Wasiirka Wasaarada **Md, Xuseen** iyo Wasiir ku xigeenka **Ms. Nimco Xuseen Qawdhan** Kulankaas oo ahaa mid is xoqwararsi ah oo ay Gudidu warbixino kaga dhegaysanaysay masuuliyiinta Wasaaradaasi, isla markaana ay su'aalo kaga waydiinayeen hawlaha ay qaranka ugu xil saran yihiin.



Waxa ay sheegeen masuuliyiintaa wasaarada cafimaadka ka socotay in mudadii ay xilka hayeen dib u habayn ku sameeyeen korna u qaadeen shaqadii wasaarada oo dibudhisna ku sameeyeen dhowr cusbitaal, qaar cusub oo gacanta lagu hayaana ay jiraan, sidoo kalena ay sharciyadii iyo siyaasadihii kale duwanaa ee wasaarada caafimaadku ku shaqayn lahayd diyaariyeen oo ay Goloyaasha sharci dejinta u soo gudbin doonaan dhawaan.

Waxa kale oo ay masuuliyiintu sheegeen in baahiyaha ugu muhiimsan ee wasaarada imika ay ugu wayntahay in wasaaradu hesho miisaaniyad ku filan oo ay shaqadeeda ku wadi karto isla markaana waxay Mudanayaasha guddida Arimaha Bulshada ku codsadeen inay kale hawl galaan marka miisaaniyada la horkeeno sidii wasaarada loogu kordhin lahaa maadaama imika ay aad ugu yartahay Miisaaniyada ay ku shaqeeyaan.

Gebo-gebadii waxaa Guddida Arimaha Bulshada iyo Diinta iyo masuuliyiinta Wasaarada caafimaadku isla qaateen xeerarkaa wasaaradu dhakhso ugu soo gudbiso oo ay si wada jirana uga shaqeeyaan sidii loo qabyo tiri lahaa sharciyada wasaarada.

04/ July, 2012 waxay Gudi hoosaadka Arimaha Bulshada iyo Diinta ee Golaha Wakiiladu kulan kula yeelatay xafiiskeeda Hayada caalimaga ah ee IRI, Hay'adan oo ka mida Hay'adaha ay wada shaqaynta leeyihiin Golaha Wakiilada, waxay Gudida Arimaha Bulshada kala hadashaday sidii ay uga caawin lahayd kormeero ay Guddidu rabto inay Gobolada kusoo marto oo ay kusoo qiimaynaysa waxqabadyada Arimaha bulshada ka jira guud ahaan wadanka maadaama ay tahay Gudidii ugu xilsaarnayd Golaha Wakiilada dhanacyada Arimaha Bulshada sida Caafimaadka, Waxbarasha, Ciyaaraha IWM.

Inkastoo ay Gudida Arimaha Bulshadu hore usoo marta Gobolada Saaxil iyo Togdheer oo warbixinana ka soo diyaarisay waxay ku talo jirtaa oo ay ka codsatay hay'ada IRI-na inay ka caawiso sidii ay Gobolada hadhayna kormeer ugu soo mari lahaayeen si ay u soo dhamaystiraan warbixin dhamaystiran oo ku saabsan xaalada guud ee Arimaha Bulshada ee wadanka. isla markaana ay ugu gudbin lahaayeen Golaha Wakiilada.

Hadaba, kulankaas ay yeesheen guddida Arimaha Bulshada iyo hayada IRI waxay isla qaateen in bishan Gudaheeda kormeerkaas Gobolada hadhay ay Gudida Arimaha Bulshadu bilowdo, Hay'ada IRI-na ay dhinaca dhaqaalaha ka caawiso isla markaana ay maalinta Arbacada ah ee ku beegan 12 ay shir kulan labaad isugu yimaadaan oo ay kusii anbaqaadayaana hawlahaas.

Guddida Khayraadka Dabiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.

waxaa xarunta Golaha Wakiilada JSI ka dhacay kulan xog waraysi ah oo ay isku waraysanayeen xildhibaanada dhowaan u kala baxay Gobolada Sool iyo Sanaag kulankan oo ay soo qaban qaabisay Hay'ada IRI ayaa waxaa nuxurkiisu ahaa sidii xildhibaanadu uga talo bixin lahaayeen isuna weydaarsan lahaayeen waxyaabihii ay kusoo kala arkeen intii ay soo marayeen Gobolada. Kormeerkan aya xildhibaanadu ku soo mareen gobolada ayaa ku saabsanaa sidii ay ugu kuur gali lahaayeen xaalada Deegaanka dhulkaas taasoo ay soo arkeen dhul badan oo nabaad guur iyo dhuxulaysi uu ka dhacay iyo weliba ugaadhii oo faro ba'an lagu hayo.

Gudoomiye ku xigeenka Labaad ee Golaha Wakiilada Mudane Ali Yusuf oo isaguna shirkan kala soo qayb galay mudanayaasha ayaa u mahadnaqay xildhibaanada booqday labada Gobol waxanu xusay in uu diyaar u yahay ka shirgudoon ahaan ayna garab taagan yihiin xildhibaanada Aragti wadaagta arimaha deegaanka (Green Caucus) oo la yimi waxqabad dhab ah, sidoo kale

wuxuu xusay in loo baahan yahay in la iska kaashado sidii wax looga qaban lahaa dhuxusha dibada loo dhoofinayo iyo in la badiyo barnaamijyada wacyigalinta ah.



Ugu danbayntii waxaa xildhibaanadu ku balameen sidii ay isaga kaashan lahaayeen wax ka qabashada xaalufinta deegaanka iyo sidii ay ugu qaylo dhaamin lahaayeen dhamaan cid kasta oo arintani ay khusayso, waxaanay mahadnaq usoo jeediyeen Hay'ada IRI oo iyadu suurto gelisey socdaalka xildhibaanada ee Gobolada Sool iyo Sanaag.

Gudidda Ilaalinta Hantida Qaranka iyo la dagaalanka Musuqa

Gudida ilaalinta iyo daryeelka Hantida Qarankia ee golaha wakiilada Jamhuuriyada Somaliland ayaa kulan xafiiskooda kula yeeshay 04/07/2012 Hantidhawraha guud ee qaranka iyo Xisaabiyaha guud. Kulankan oo ahaa mid is xaalwaraysi iyo xogogaal u noqosho dhinac walba ah ayaa waxay ugu horayn gudidu la kulantay Hantidhawraha, mudane Maxamuud Aw- Cabdi Ibraahim waxaanay gudida iyo hantidhawruhu ka wada hadleen sidii guud ahaan loo yarayn lahaa musuqmaasuqa ka jira dalka iyo in wadashaqayn laga yeesho hawlaha xasaasiga ah, kuwa taagan iyo baadhitaanadii hore loo sameeyey.

Hantidhawre Maxamuud Aw- Cabdi Ibraahim (M.Dheere) ayaa gudida uga xogwaramay kiisaskii musuqmaasuq ee dhacay iyo sida ay wax uga qabteen waxaanu u sheegay ina aanu gudida la'aantood waxba qaban Karin.

Gudida ilaalinta iyo daryeelka Hantida qaranka oo uu gudoominayay gudoomiyaha gudidaas ayaa halkaas ku waydiisay su'aalo dhawra isla markaana u balanqaaday inay si buuxda ula shaqayn doonaan isaga iyo cidkasta oo shaqadoodu khusayso isla markaana si adag ugu sheegay in laga bilaabo manta ay siwadajira hawlgalo baadhiseed iyo qaar sixideedba si wadajira ugeli doonaan.

Waxa isna kulankaa ka dib ay gudidu la kulantay Xisaabiyaha guud ee Qaranka Maxamed Cabdi Bade oo ay gudidu isagana xafiiskooda ugu yeedhay si uu uga warbixiyo qarashaadka iyo dakhliga guud ee dawladu sida uu u maro dhabaha saxda ah iyo in ay jiraan qaladaad mudooyinkii u danbeeyey, Xisaabiye Bade ayaa warbixin dheer siiyey gudida isla markaana uga xogmaramay kormeer uu dhawaan dalka oo dhan ku soo maray, waxa uu xisaabiyuhu sheegay inaanay weli soo bixin warbixin 6 biloodle ah oo ay ku qiimeeyaan sida miisaaniyadu u hirgashay in odoroskii dakhliga iyo qarashgarayntu sideedii u socoto, isla markaana ay gudida sida ugu dhakhsaha badan ugu soo gudbin doonaan.

Waxanay gudidu halkaas ku waydiisay su'aalo dhawra oo kusaabsan shaqadiisa iyo caqabadaha haysta ilaa hada halkaas oo isaguna ugaga jawaaba.

Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga iyo Qorsheynta Qaranka.

04/08/2012 Gudidda Arrimaha Dibada, iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka waxay kulan xogwareysi la yeelatay Wasiirka iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada Md. **Maxamed C/lahi Omar** iyo **M. Mawliid Maxamud**, Wasiiradu waxay Gudidda Xogwareysi ka siiyeen, Hawlaha Qaran ee Wasaaradoodu Xukuumada u qaabilsantahay sida siyaasad Arrimaha dibad, Xidhiidhka Caalamiga ah, Wada hadaladii Somaliland iyo Somaliya, IGAD iyo hawlaha qaran ee iminka wasaaradu ku hawlantahay oo ka mid tahay Wakiilada Somaliland ee dalalk dunida, xidhiidhka dalalka jaarka ah sida itoobiya, Xidhiidhka Hay'adaha Caalamiga ah iyo qaab dhismeedka Wasaaradaba, iyadoo mudanayaashuna wasiirada waydiiyeen su'aalo, siiyeen wixii talo ee kala Gudboonaa Warbixintay siiyeen iyo hawlaha shaqo ee wasaaradu khuseeya.

05/08/2012 waxay Gudidda Arrimaha Dibada, iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka waxay kulan xogwareysi la yeelatay Wasiirka Wasaarada Qorsheynta Md. **Dr. Sacad Cali shire**, oo Gudidda u yeedhay si ay wax uga waydiisyo Hawlaha shaqo ee wasaaradu qaabilsantahay halkay marayaan, sida Qorshihii 5 sano (5 years plan 2012-2016) halkuu marayo, Qorshayaasha kale ee Wasaarada u yaala iyo guud ahaanba waxyaabaha Wasaarada u qabsoomey iyo waxaan u qabsoomin oo sababeysan.

Warbixin dheer oo Dr. Sacad Cali shire siiyay Gudidda isagoo ka hadlay ugu horeyn Qorshayaasha, wuxu gudidda u qaybiyay laba nuqul oo kala ah 5 year plan 2012-2016 and Somaliland Vision into 2030 oo daabacaadooda Wasaaradu dhameysay, isagoo sheegay in sanadkan ay bilaw tahay Qorshihii shanta sano oo inta sanadka tagtey uu socdey wixii uga qabsoomey, Halkuu marayo iyo caqabadaha ka horyimi, sidoo kale wuxuu ka hadlay Hay'adaha wadanka jooga tiradooda oo uu sheegay in 55 hay'adood oo international ah iyo 22 hay'adood oo UNta ahi inay dalka joogaan, sidoo kale wuxuu ka hadlay qorshayaasha kale ee wasaarada u yaala.

Ugu danbeyn, Mudanayaasha Gudidda waxay su'aalo ka weydiiyay Wasiirka Warbixinta uu siiyay iyo Hawlaheeda kale ee shaqo, waxayna u mahadnaqeen Wasiirka

11. kormeero kala duwan oo Gobolada Mudanayashu ku tagen.

Hargeysa:-

Kooxda aragti wadaagta Deegaanka ee Xildhibaanada Golaha Wakiilada ayaa maanta 01/08/2012 kormeer kusoo maray goobo kamid ah meelaha qashinka lagu daadiyo ee magaalada Hargeysa.



Goobahan oo u badnaa agagaarka brij-ka Hargeysa iyo Jajabka ayaa waxaa aad u tuuraa Qashin laxaad leh oo goobahaa lagu soo daadiyey. Qashinkan oo caafimaad daro balaadhan ku haya dadka iyo xoolahaba ayaa wuxuu dhex tuuranyahay goobaha laga dhaansado biyaha, waxaana isku dhexyaala ceelashii biyaha laga dhaansanayey iyo khashinkii taasina waxaa ay sababi kartaa caafimaad daro aad u weyn.

Kormeerkan xildhibaanada ayaa waxaa uu salka ku hayaa sidii shuruuc xakamaysa looga soo saari lahaa Qashinka iyo waxyaabaha Deegaanka halista ku ah, hawl Qarana looga wada yeelan lahaa, waxaana kormeerkaa ka qaybqaatey xildhibaanada kala ah, Md. Siciid Maxamed Cilmi, Md. C/raxmaan Maxamed Jaamac, Md. Ibraahim Axmed Haybe iyo Md. Aadan Muxumed Hoori (Mataan)

Sidoo kale 16/07/2012 sssmudanayashu waxay ay kormeer kusoo mareen goobo ka tirsan Gobolka Maroodi-Jeex, kormeerkan oo la xidhiidha u kuurgalka Xaalada deegaan ee gobolka maroodi jeex ayaa waxaa ay xildhibaanadu ka bilaabeen Gebiley oo ay soo mareen Goobaha qashin qubka ee dawlada hoose u astaysay in qashinka la geeyo, waxaa kale oo ay soo mareen kawaanka xoolaha lagu qalo ,goobahaas oo ay dhamaantood warbixino kaga dhegeysteen masuuliyiinta Gebiley oo uu ugu horeeyo Badhasaabka Gobolka Gebiley.

Kormeerkan xildhibaanada aragti wadaagta deegaanka (Green cocoas Team) ayaa wuxuu dabo socdaa kormeero hore oo ay kooxo ka tirsan xildhibaanada aragti wadaagta deegaanku kusoo mareen Gobolada Awdal, Sool iyo Sanaag, waxaana kormeeradan xildhibaanada ka caawisa oo u fududaysa dhinaca logistic ka Hay'ada IRI (International Republic Institute)

Sanaag:- Waxaa safar shaqo ugu baxay Gobolka Sanaag Xildhibaanada katirsan Golaha Wakiilada, Xildhibaanada oo ah kuwa laga soo doorto deegaanka Gobolka Sanaag ayaa waxa uu socdaalkoogu daaranyahay, in ay dib ugu noqdaan oo ay ka soo warhelaan xaalada dadweynihii soo doortay.

Hadaba Xildhibaanadan oo muddo afar maalmood safakoodu qaadan doono waxa ay la kulmi doonaan qaybaha kala duwan ee bulshada ku dhaqan deeganadaas hadii ay yihiin odayaal, dhalinyar iyo dumarba. Iyaga oo u kuur gali doona duruufaha dhaqaale, caafimaad iyo bulsho ee ka jira deegaamadoodii laga soo doortay.

Sida oo kale waxa ay la kulmi doonaan xildhibaanadani maamulka ka jira deegaanadaasi oo isagana ay ka dhagaysan doonaan warbixinaha xaga maamulka ee Gobolka.

Isla markaa waxa xildhibaanadu mudada ay socdaalka ku joogaan halkaa waxa ay booqan doonaan xarumaha waxbarashada, dhakhtarada iyo Goobaha kale ee caafimaad iyaga oo warbixin dhamays tiran kasoo gudbin doona mara ay soo noqdaan.

Si kastaba ha ahaatee waxa baryahanba isa soo tarayay socdaalada Xildhibaanada ee kuwan oo kale ah oo mudanayaasha Golaha Wakiiladu ugu kuur galayaan sida ay tahay xaalada dadweynihii soo doortay, maadaama uu Baarlamaankani yahay kii ugu horeeyay ee ay dadweynuhu codkooda kusoo doorteen.

Arintan oo ay si diiran u soo dhaweeyeen dadweynaha ku dhaqan deegaanadaasi maadaama ay tahay xidhiidh toos ah oo la yeelanayaan madaxdoodi i ay iyagu doorteen. Xildhibaanada safarkan u baxay waxaa ka mid ah:

1. Md, Saleebaan Cawad Cali
2. Md, Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan
3. Md, Ibraahim Caraale cabdi
4. Md, Maxamed cismaan Maxamed (Bulqaas)

12. Safaradii Dibada ee Golaha Wakiilada.

Wafti uu hogaaminayo Guddoomiye xigeenka labaad ee baarlmaan Somaliland Mudane Dr. Ali Yusuf Ahmed iyo Guddoomiyeyaasha Sideeda Guddi hoosaad ee uu ka kooban yahay aqalka Wakiilada Baarlamaanka Somaliland oo kala ah.

1. Mud . Saed Elmi Rooble-----Gud. Guddida Arrimaha Guddaha iyo Difaaca.
2. Mud. Ahmed Nour Kijandhe----Gud. Guddida Arrimaha Bulshada iyo Diinta.
3. Mud. Saed Mohamed Elmi-----Gud. Guddida Deegaanka iyo Kheyradka dabiiciga.
4. Mud. Aden Tarabi Oogle.-----Gud. Guddida ilaalinta Hantida Qaranka.
5. Mud. Hussein Mohamed Egeh.--Gud. Guddida Arrimaha Dibada iyo Xidh.Caalmiga
6. Mud.Ahmed Diriye Nac-nac.----Gud. Guddida Joogtada iyo Anshaxa.
7. Mud. Mohamed Mohamoud Omer Hashi.--Gud. Guddida Dhaqaalaha iyo Maal.
8. Mud. Abdirahman Osman Alin.---Gud. Guddida Gar, Cad. iyo Xuuquqal Insaanka.
9. Iyo Abdinasir Osman Mahamoud.---Agg. Qorshaynta ee Golaha wakiilada.



Waftigan oo maalmo dhawr ahba ku joogay safarshaqo baarlamaanka dhigooda ah ee dalka aynu jaarna nahay ee Ethiopia ayaa maanta soo gaba-gaboobay, Waftigan oo intii ay joogeen addis ababa la kulmay madaxda baarlmaan dalka Ethiopia ayaa waxay ku eegayeen sida ay u shaqeeyaan guddi hoosadka aqalka wakiilada Ethiopia, waxayna waftigan su'aalo iyo jawaabo is dhaafsadeen dhigooda xubnaha ka ah baarlamaanka Ethiopia.

Waxaa kale oo waftigu kala qaybgalay baarlamaanka Ethiopia fadhi ay lahaayeen kaas oo lagu dhagaysanayey war-bixin balaadhan oo uu soo jeediyey wasiirka shaqaalaha dawlada (Minster of Civil service).

Intaa Ka dib Guddoomiyaha Baarlamaanka Ethiopia ayaa qado sharaf ku martiqaaday xubnaha baarlamaanka ee ka socday aqalka wakiilada ee Somaliland, qado sharaftan oo ka dhecday xarunta baarlmaan dhextiisa waxaa ka soo qaybgalay xubno ka tirsan mudaayasha baarlamaanka Ethiopia oo laga soo kala doorto gobolo kala duwan sida kuwaa laga soo doorto kililka somalilada Ethiopia, waxa kale oo joogay Xoghaya Guud ee baarlamaanka iyo shaqalaha kala duwan ee baarlamaanka Ethiopia iyo wakiil xigeenka safaarada Somaliland ee Ethiopia Mudane Ayaanle .

Guntii iyo gabo-gabodii waxaa uu safarkan shaqo ku soo dhamaaday jawi farxadeed waxaana ay dhinoocada balanqaadeen mas'uuliyiinta ka socday baarlamaanka Somaliland inay marti qaadi doonaan qaarka tirsan mas'uuliyiinta iyo mudanayaasha baarlamaanka Federalka Ethiopia. Waxaana labada dhinac isla afgarteen sii xoojinta xidhiidhka baarlamaanadalabada dal ee jaarka ah.



Dhinaca kale waftigan marka ay ka soo ambabaxeen magaalo madaxda addis ababa ee dalka Ethiopian waxay martiqaad ay ka heleen madaxweynaha dawlad deegaanka somalida Ethiopia ee kililka shanaad halkaas oo ay ku sii mareen lana kulmeen madaxda kililka shanaad ee Ethiopia

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 18^{aad}